# Taageerooyinka aad ku iibsan karto lacagaha NDIS-ta

Somali | Soomaali

## Haddii aad rabto in dukumiintigan lagaa caawiyo

Waxaad heli kartaa qof kaa caawiya:

- inaad fahamto dukumiintigan
- inaad hesho macluumaad dheeraad ah.

Macluumaadka ku saabsan halkaad la soo xiriireyso wuxuu ku qoran yahay dhamaadka dukumiintigan.

## Ku saabsan dukumiintigan

Wakaaladda Caymiska Naafada Qaranka (The National Disability Insurance Agency - NDIA) ayaa qortay dukumiintigan.

Marka aan isticmaalno ereyga annaga, waxa laga hadlaya waa NDIA.

Waxaan bixinaa Qorshaha Caymiska Naafada Qaranka ama NDIS.

Dukumiintigani wuxuu ku saabsan yahay taageerooyinka aad **awoodo** inaad u isticmaasho maalgelinta NDIS.

# Maxaa ku jira dukumiintigan?

Haddii aad rabto in dukumiintigan lagaa caawiyo 1

Caawimada hoyga ama caawimada kirada 5

Xayawaanka wax caawiya 5

Inay kaa caawiso isku xidhka ama maaraynta marxaladaha nolosha, kala-guurka iyo taageerada 5

Caawimaada la xiriirta sidii aad ku heli lahayd ama u tagi lahayd isla mar ahaan taasna aad usii joogteyn lahayd shaqada ama waxbarashada sare 6

Caawinta hawlaha nolol maalmeedka marka aad koox ka tirsan tahay ama nolosha aad dad kale la wadaagto 6

Caawinta safarka ama in laguu diyaariyo baabuur 7

Qalabka ku caawinaya ee loogu talagalay madadaalada 7

Waxyaabaha qofka caawiya marka uu qabsanayo howlaha guriga 8

Waxyaabaha qofka ka caawinaya inuu nafsadiisa daryeelo iyo badbaadada 8

Qalabka lagu wada hadlo iyo kuwa macluumaadka la iskula wadaago 9

Daryeelka kalkaalinta bulshada 9

Xubin jireed (prosthetics) ama waxyaabaha awooda siiya jirka (orthotics) oo gooni kuu ah 10

Hawlaha gaarka ah ee maalinlaha ah 10

Horumarinta daryeelka maalinlaha ah iyo xirfadaha nolosha 10

Taageerada caafimaadka ee la xidhiidha iinta/naafada 11

Taageerada ay caruurta helaan marka ay yaryihiin 11

Jimicsi, (physiology) iyo howlaha hormarinaya caafimaadka guud ee qofka 12

Howlaha koox ahaan loo sameeyo iyo kuwa meel gaar ah lagu sameynayo 12

Qalabka maqalka 12

Dhaqdhaqaaqyada gaarka ah ee maalinlaha ah ee u baahan in jirka aad looga shaqeysiiyo 13

Dib u habaynta guriga iyo dhismaha 13

Hawlaha guriga 14

Inaad qeyb ka ahaato bulsho hal-abuur leh 14

Fasiraada iyo turjumaada 14

Maareynta lacagaha loogu talagalay in laguugu caawiyo 15

Ka qayb qaadashada bulshada, mujtamaca iyo hawlaha bulshada 15

Qalabka kaa caawinaya dhaqdhaqaaqa ee si khaas ah adiga laguugu talagalay 15

Guri loogu talagalay dadka iinta/naafada gaarka ah qaba 16

Tababar gaar ah oo darawalnimo 16

Adeegyada maqalka ee gaarka ah 16

Taageerada dhaqanka togan ee gaarka ah 17

Shaqooyinka sida gaarka ah loo taageero 17

Isuduwidda taageerada (support coordination) 17

Taageerada daaweynta (therapeutic supports) 18

Baabuurka marka waxyaabo loo sameynayo 18

Qalabka wax lagu arko 18

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumiintigan 20

Wax badan ka baro NDIA 20

Hel caawimo si aad noola soo xiriirto 20

## Caawimada hoyga ama caawimada kirada

Hoyga ama kirada waxaa laga wadaa meesha aad ku nooshahay.

Caawimada waxay ka dhigan tahay inay taas kaa caawiso.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho:

- taageerada kaa caawinaysa inaad hesho meel aad ku noolaato
- taageerada kaa caawinaysa inaad kusii noolaato meesha aad hadda ku nooshahay.

## Xayawaanka wax caawiya

Xayawaanka wax caawiya waa xayawaan loo tababaray inay taageeraan dadka naafada ah. Tusaale ahaan, eeyaha qofka hagaya.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho xayawaanka u qalma inay caawimaad bixiyaan.

Xayawaanka u qalma inay caawimaad bixiyaan waa xayawaan tababbaran oo imtixaan ka gudbay.

## Inay kaa caawiso isku xidhka ama maaraynta marxaladaha nolosha, kala-guurka iyo taageerada

Isku xidhka ama maaraynta macnaheedu waa in la ilaaliyo lala socdo.

Marxaladaha nolosha iyo kala-guurka macnaheedu waa marka ay arrimaha noloshaada wax isbedel ah ku yimaadaan.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho shaqaale ku caawinaya si ay kuu tusaan sida aad adiga wax u samaysan lahayd.

Tusaale ahaan, sida:

- loogu dhex socdo guriga
- loo tago balamaha.

## Caawimaada la xiriirta sidii aad ku heli lahayd ama u tagi lahayd isla mar ahaan taasna aad usii joogteyn lahayd shaqada ama waxbarashada sare

Joogteyn waxaa laga wadaa usii wadi lahayd.

Waxbarashada sare macneheedu waxa weeye waxbarashada timaada marka aad dhamayso dugsiga sare.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerooyinka:

- kaa caawinaya inaad dugsiga sare ugasii gudubto waxbarasho sare
- kaa caawinaya inaad shaqo hesho
- kaa caawinaya inaad sii heysato shaqada aad hadda ka shaqeysid.

## Caawinta hawlaha nolol maalmeedka marka aad koox ka tirsan tahay ama nolosha aad dad kale la wadaagto

Koox ka tirsan tahay ama nolosha aad dad kale la wadaagto waxaa laga wadaa haddii aad la nooshahay dad kale.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerooyinka kaa caawinaya inaad wax ku dhex qabsato gurigaaga.

Tusaale ahaan, shaqaale ku caawinaya si ay kuu tusaan sidii aad:

- u daryeeli lahayd naftaada
- wax u karsan lahayd
- u nadiifin lahayd gurigaaga.

## Caawinta safarka ama in laguu diyaariyo baabuur

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho safarka iyo gaadiidka haddii:

- aadan kaligaa socon/safri karin
- aadan isticmaali karin gaadiidka dadweynaha.

Tusaale ahaan, waxaad u isticmaali **kartaa** qaar ka mid ah maalgelintaada NDIS si aad tagsi ugu raacdo:

- si aad u hesho taageerooyinka NDIS
- si aad dugsi u aado
- si aad shaqo u aado.

## Qalabka ku caawinaya ee loogu talagalay madadaalada

Qalabka ku caawinaya waa wax la bedelayo si ay kaaga caawiyaan inaad wax qabsato.

Madadaalada macneheedu waa waxyaabo aad u samayso madadaalo ahaan, sida ciyaaraha.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho si aad u bedesho qalabkaaga kadibna aad u isticmaasho.

## Waxyaabaha qofka caawiya marka uu qabsanayo howlaha guriga

Waxyaabaha qofka caawiya marka uu qabsanayo howlaha guriga waxaa laga wadaa waxyaabo la bedalayo si aad u isticmaasho.

Tusaale ahaan, waxyaabo qaar ayaa u baahan in la bedalo si ay kaaga caawiyaan inaad qabato shaqooyinka sida:

- nadaafinta gurigaaga
- cunto karinta.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho inaad kusoo iibsato waxyaabaha loo baahan yahay in la badalo si aad gurigaaga uga shaqeyso.

## Waxyaabaha qofka ka caawinaya inuu nafsadiisa daryeelo iyo badbaadada

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho waxyaabaha sida:

- alaabaha kala duwan ee musqusha iyo qubeyska loogu talagalay
- dharka iyo alaabta guriga (furniture) ee caawinaysa baahidaada.

## Qalabka lagu wada hadlo iyo kuwa macluumaadka la iskula wadaago

Qalabka lagu wada hadlo iyo kuwa macluumaadka la iskula wadaago waa waxyaabaha:

- kaa caawinaya inaad hesho macluumaad
- kaa caawinaya inaad dadka kalena u gudbiso macluumaad.

Tusaale ahaan, muuqaal fududeyn kara wadahadalka (communication board).

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho waxyaabaha kaa caawin kara:

- wada hadalka
- inaad hesho macluumaadka aad u baahan tahay.

## Daryeelka kalkaalinta bulshada

Daryeelka kalkaalinta bulshada waxaa loola jeedaa in aad gurigaaga daryeel ku heli karto.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho daryeelka kalkaalinta bulshada haddii aad daryeel uga baahan tahay qof leh tababar gaar ah.

Tusaale ahaan, waxaad u baahan tahay kalkaaliso tababar gaar ah leh si aad u maareeyso daawooyinkaaga.

## Xubin jireed (prosthetics) ama waxyaabaha awooda siiya jirka (orthotics) oo gooni kuu ah

Gooni kuu ah macnaheedu waa wax loo sameeyay hal qof kaliya.

Xubin jir (prosthetics) macnaheedu waa xubnaha jirka ee uu bini'aadam sameeyay.

Waxyaabaha awooda siiya jirka (orthotics) macnaheedu waa waxyaabaha taageera jidhkaaga, sida gacanta ama lugta.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho xubin jir (prosthetics) ama waxyaabaha awooda siiya jirka (orthotics) oo gooni kuu ah.

## Hawlaha gaarka ah ee maalinlaha ah

Hawlaha gaarka ah ee maalinlaha ah waxaa laga wadaa waxyaabo aad u baahan tahay inaad sameyso maalin kasta. Tusaale ahaan, qubeyska.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho siday kaaga caawin lahayd waxyaabaha aad u baahan tahay inaad sameyso maalin kasta.

## Horumarinta daryeelka maalinlaha ah iyo xirfadaha nolosha

Daryeelka maalinlaha ah iyo xirfadaha nolosha waxay ka dhigan tahay inaad noqon karto qof isku filan.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho si ay kaaga caawiso inaad barato daryeelka maalinlaha ah iyo xirfadaha nolosha.

## Taageerada caafimaadka ee la xidhiidha iinta/naafada

Taageerada caafimaad ee la xidhiidha iinta waa taageerooyinka aad u baahan tahay si ay kaaga caawiyaan inaad wax qabsato maalin kasta.

Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in laqitaanka ay kugu adagtahay oo aad qabtid dysphagia aadna u baahan tahay qalab gaar ah oo kaa caawinaya sidii aad cuntada u cuni lahayd.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerooyinka caafimaadka ee la xidhiidha iinta.

## Taageerada ay caruurta helaan marka ay yaryihiin

Marka ay yaryihiin waxaa laga wadaa marka ay caruur yar yihiin:

- oo ay da'doodu ka yar tahay 6 sano ayna korriimadoodu hooseyso marka loo eego carruurta kale
- marka ay ka yaryihiin 9 sano ayna iin/naafonimo leeyihiin.

Korriimada waxaa laga wadaa sida carruurtu u koraan oo ay wax u bartaan.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerada ay u baahan yihiin carruurta marka ay yarihiin sida teerabiga (therapy) loogu talagalay inay carruurta ka caawiso:

- wada hadalka
- inay wax bartaan.

## Jimicsi, (physiology) iyo howlaha hormarinaya caafimaadka guud ee qofka

Physiology waxaa laga wadaa sida jirkaagu u shaqeeyo.

Caafimaadka guud waxaa laga wadaa inaad caafimaad qabto oo aad wanaagsan tahay.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho waxyaabaha u wanaagsan caafimaadkaaga.

Tusaale ahaan, inaad ku bixiso lacagaha uu kaa qaadanayo xirfadle kaa caawinaya:

- sidii aad u socon lahayd
- sidii aad jirkaaga u dhisi lahayd.

## Howlaha koox ahaan loo sameeyo iyo kuwa meel gaar ah lagu sameynayo

Meel gaar ah lagu sameynayo macneheedu waa meel ay dadku tagaan si ay hawlo u wada qabtaan. Tusaale ahaan, xarun bulsho.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho howlaha koox ahaan loo sameeyo iyo kuwa meel gaar ah lagu sameynayo.

## Qalabka maqalka

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho waxyaabo kaa caawin kara wax-maqalka.

## Dhaqdhaqaaqyada gaarka ah ee maalinlaha ah ee u baahan in jirka aad looga shaqeysiiyo

Dhaqdhaqaaqyada gaarka ah ee maalinlaha ah macnaheedu waa waxyaabaha ay tahay inaad sameyso maalin walba.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato:

- inay dad badan ku caawiyaan
- qalab gaar ah oo ku caawinaya.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho si ay kaaga caawiyaan hawlahan.

## Dib u habaynta guriga iyo dhismaha

Nakhshadeynta guriga iyo dhismuhu waxay ka dhigan tahay sida gurigaaga:

- wax looga bedalayo si uu u taageero iintaada
- loo qorsheeynayo nidaamkiisa si uu u taageero naafadaada
- loo dhisayo si uu u taageero naafadaada.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho si aad si sahlan ugu noolaato gurigaaga.

Tusaale ahaan, inaad ku kharash gareyso isbedelada kaa caawinaya inaad noqoto qof isku filan markaad guriga joogto.

## Hawlaha guriga

Waxaad awoodaa inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho waxyaabaha aad u baahan tahay in lagaa caawiyo sababo la xiriiro naafinimada/inta.

Tusaale ahaan:

- cunto-karinta
- nadiifinta
- dhar dhaqidda.

## Inaad qeyb ka ahaato bulsho hal-abuur leh

Inaad qeyb ka ahaato bulsho hal-abuur leh waxaa laga wadaa taageerada dadka baahiyaha badan qaba.

Waxay ka caawisaa dadka baahiyaha badan qaba inay ka qayb qaataan nolosha bulshada.

## Fasiraada iyo turjumaada

Fasiraada iyo tarjumaada waxaa laga wadaa inaad hesho macluumaad ku qoran:

- luuqad aad fahmi karto
- qaab aad fahmi karto.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho adeegyada fasiraada iyo turjumaada.

## Maareynta lacagaha loogu talagalay in laguugu caawiyo

Maareynta lacagaha loogu talagalay in laguugu caawiyo waxaa laga wadaa qof adiga kuu maamula lacagahaaga NDIS ta.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho sidii u heli lahayd qof kuu maareeya qorshahaaga NDIS ta.

Qofka kuu maareynaya qorshahaaga wuxuu awoodaa:

- inuu kuu helo taageerada aad u baahan tahay
- inuu lacagaha kala siiyo dadka adiga wax kuu qabanaya.

## Ka qayb qaadashada bulshada, mujtamaca iyo hawlaha bulshada

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerada aad kaga qeyb qaadaneyso hawlaha aad u baahan tahay inaad ka qeyb qaadato.

## Qalabka kaa caawinaya dhaqdhaqaaqa ee si khaas ah adiga laguugu talagalay

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho qalabka kaa caawinaya dhaqdhaqaaqa ee si khaas ah adiga laguugu talagalay. Tusaale ahaan, biraha lagu socdo.

## Guri loogu talagalay dadka iinta/naafada gaarka ah qaba

Guri loogu talagalay dadka iinta/naafada gaarka ah leh ama (Specialist disability accommodation - SDA) micnaheedu waa guryo loogu talagalay dadka baahiyaha badan qaba.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho SDA.

## Tababar gaar ah oo darawalnimo

Tababarka dareewalnimada gaarka ah waxaa loola jeedaa:

- waxaad baranaysaa inaad isticmaasho qalab gaar ah si aad baabuur u wado
- waxaad baranaysaa sida loo wado baabuur gaar ah.

Waxaad **awoodi** kartaa inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho tababarka darawalnimada gaarka ah.

## Adeegyada maqalka ee gaarka ah

Adeegyada maqalka ee gaarka ah waa adeegyada maqalka ee loogu talagalay dadka baahiyaha badan qaba.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho adeegyada maqalka ee gaarka ah.

## Taageerada dhaqanka togan ee gaarka ah

Waxaadawoodaa inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerada dhaqanka togan ee gaarka ah.

Taageerada dhaqanka togan ee gaarka ah waxaa laga wadaa dadka haysta tababar gaar ah inay ku caawiyaan haddii:

- aad sameyso waxyaabo khatar leh
- aad sameyso waxyaabo khatar gelin kara qof kale.

## Shaqooyinka sida gaarka ah loo taageero

Shaqooyinka sida gaarka ah loo taageero waxaa laga wadaa in lagaa caawiyo sidii aad shaqo ku heli laheed haddii:

- aad leedahay baahiyo badan
- aad u baahan tahay taageero badan markaad shaqada ku jirto.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho shaqooyinka sida gaarka ah loo taageero.

## Isuduwidda taageerada (support coordination)

Isuduwidda taageerada (support coordination) waxaa laga wadaa inaad hesho caawimo dheeraad ah si aad ula xidhiidho:

- qoys
- asxaabta
- bulshada iyo taageerada NDIS ta.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho isuduwidda taageerada (support coordination) gaarka ah.

## Taageerada daaweynta (therapeutic supports)

Taageerada daaweynta (therapeutic supports) waxay ka caawisaa dadka:

- wada hadalka
- meelaha ay rabaan inay tagaan
- isku filnaadaan.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho taageerada daaweynta (therapeutic supports).

## Baabuurka marka waxyaabo loo sameynayo

Baabuurka marka waxyaabo loo sameynayo waxaa laga wadaa waxyaabo muhiim ah marka aad baabuurka u sameyso kuwaas oo:

- kaa caawinaya inaad gaari wado
- kuu sahli kara inaad gaariga gasho.

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho waxyaabo muhiim ah oo baabuurka loo sameynayo.

## Qalabka wax lagu arko

Waxaad **awoodaa** inaad maalgelinta NDIS u isticmaasho qalabka wax lagu arko.

Qalabka wax lagu arko waxaa laga wadaa waxyaalaha kaa caawin kara inaad wax aragto ama akhrido.

Tusaale ahaan:

- farta indhoolaha
- ookiyaale muuqaalka weynaynaya.

Ookiyaalaha muuqaalka weynaynaya waxa uu waxkasta kaaga dhigaya inay ka weyn yihiin sida caadiga ah.

## Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumiintigan

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dukumiintigan, fadlan nala soo xiriir.

Waxaad na soo wici kartaa **1800 800 110**

Waxaad noo soo diri kartaa iimayl **enquiries@ndis.gov.au**

Waxaad si toos ah u booqan kartaa mid ka mid ah xafiisyadeena

Waxaad ka heli kartaa xafiiska deegaankaaga mareegaha NDIS.

**ndis.gov.au/contact/locations**

## Wax badan ka baro NDIA

Booqo mareegaheena **ndis.gov.au**

Nagala soco kanaaladeena bulshada

**Facebook-ga, Twitter, Instagram, YouTube, LinkedIn**

## Hel caawimo si aad noola soo xiriirto

Dadka u baahan in laga caawiyo luuqada Ingiriiska waxaad ka wici kartaa: Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS). **131 450**

Dadka dhegoolka ah ama maqalku ku adag yahay Waxaad isticmaali kartaa:

Adeegga Gudbinta Qaranka. **relayservice.gov.au**

Waxaad isticmaali kartaa qaabka telefoonka qoraalka (text telephone mode - TTY). **1800 555 677**

Waxaad isticmaali kartaa gudbinta codka. **1800 555 727**